### Macluumaadka ku socda waalidka

# Oo ku sabsan mamnuucida gudniinka dumarka (FGM)

**Dhamaan carruurta Swiidhan degan waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubka iyo dagaalka.**
Taasi waxa ka mid ah dhamaan noocyada gudniinka xubnaha taranka dumarka (FGM), sida tolniinku, sunnada, gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida. Dhamaan qaliinada aan caafimaadka ku lugta laheyn ayaa mamnuuc ah. Dhamaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin caafimaadka ugu wanaagsan ee suurtogalka.

### Khataraha iyo dhibaatooyinka

Marka la sameynaayo qaliinka laftiisa (gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida), waxay gabadhaadu khatar ugu jirtaa inay aad u dhiigbaxdo iyo xanuun, iyo in ay qaado infegshan, tusaale ahaan infegshanaa dhiiga raaca.  FGM sidoo kale waxay shoog galisaa carruurta iyadoo khatar ugu jirta inay soo gaadho dhibaatooyinka dhimirka.

Ma aha kaliya taas, haddii aad gabadhaada ku sameyso FGM waxay yeelan doontaa dhibaatooyin caafimaad oo nolosheeda oo dhan ay qabto. Ta ugu badan waxa weeye inaanay caadi u kaaji karin: wakhti badan ayay qaadataa waana mid xanuun badan leh. Marka ay iyadu ka sii korto ee ay hesho caadada, dhiiga aan ka soo bixin waxa uu keeni karaa

Somaliska

### Macluumaadka ku socda waalidka

# Oo ku sabsan mamnuucida gudniinka dumarka (FGM)

**Dhamaan carruurta Swiidhan degan waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubka iyo dagaalka.**
Taasi waxa ka mid ah dhamaan noocyada gudniinka xubnaha taranka dumarka (FGM), sida tolniinku, sunnada, gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida. Dhamaan qaliinada aan caafimaadka ku lugta laheyn ayaa mamnuuc ah. Dhamaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin caafimaadka ugu wanaagsan ee suurtogalka.

### Khataraha iyo dhibaatooyinka

Marka la sameynaayo qaliinka laftiisa (gudniinka, daloolinta, gubasho, tolida), waxay gabadhaadu khatar ugu jirtaa inay aad u dhiigbaxdo iyo xanuun, iyo in ay qaado infegshan, tusaale ahaan infegshanaa dhiiga raaca.  FGM sidoo kale waxay shoog galisaa carruurta iyadoo khatar ugu jirta inay soo gaadho dhibaatooyinka dhimirka.

Ma aha kaliya taas, haddii aad gabadhaada ku sameyso FGM waxay yeelan doontaa dhibaatooyin caafimaad oo nolosheeda oo dhan ay qabto. Ta ugu badan waxa weeye inaanay caadi u kaaji karin: wakhti badan ayay qaadataa waana mid xanuun badan leh. Marka ay iyadu ka sii korto ee ay hesho caadada, dhiiga aan ka soo bixin waxa uu keeni karaa

xanuun badan. Taasi waxay keeni kartaa madax xanuun, calool xanuun, dhabar xanuun iyo dabeecada oo isbabadesha. Taas waxa dheer, dumarka qaarkood ee ay soo martey FGM waxay yeeshaan dhibaatooyin galmada iyo dhibaatoyin inay carruur helaan.

## Waalid ahaan waa adiga masuuliyadaada

Adiga ayaa ah qofka ugu muhiimsan gabadhaada, sidaas darteed waa adiga masuuliyadaada inaad nooc kasta oo FGM ah ka ilaaliso inanataada. Ma aha sharci darro kaliya in la sameeyo uun ee waa xataa, si qarsoodi ah in loo qorsheeyo iyo in la qadariyo FGM. Adiga ayay masuuliyad ka saaran tahay xataa haddii uu qof kale sameeyo qaliinka, iyo xataa haddii uu ka dhaco Swiidhan meel ka baxsan. Waa inaad sameyso waxkasta oo adiga awoodaada ah si aad ilmahaaga uga ilaaliso FGM. Ciqaabta waalidka gabadhooda loo geystey FGM waa muddo xadhig 2-10 sanno ah.

## Caawimo ayaa la heli karaa haddii cadaadi aad dareemayso

Waalidiinta qaarkood ayaa dareemaaya cadaadis qoyska iyo qaraabada kaga yimaada inay gabdhahooda u sameeyaan FGM. Si lagaaga caawiyo inaad u sharaxdo in FGM laga mamnuucay Swiidhan, waxaanu soo saarney qoraal sharaxaaya mamnuucida FGM-ka. Waxaa u sii qaadan kartaa markasta oo aad la kulmeyso dadka isku deyaaya inay cadaadiska ku saaraan, si ay kuu fahmaan, waalid ahaan, khatarta xabsi loogu galaayo haddii aanad gabadhaada ka ilaalin FGM.

**Macluumaad dheeraad ah waxa laga helayaa:** www.hedersfortryck.se

Region Kalmar län

Taariikhda dib loo cusbooneysiiyey: 2016

Qoraalka waxa lagu dalban karaa isagoo ah cod CD ku duuban, Farta indhoolka ama isagoo Swiidhish fudud ah. La soo xidhiidh **Waaxda Isgaarsiinta** adihoo soo maraaya khadka gudbinta 0470-58 80 00.

xanuun badan. Taasi waxay keeni kartaa madax xanuun, calool xanuun, dhabar xanuun iyo dabeecada oo isbabadesha. Taas waxa dheer, dumarka qaarkood ee ay soo martey FGM waxay yeeshaan dhibaatooyin galmada iyo dhibaatoyin inay carruur helaan.

## Waalid ahaan waa adiga masuuliyadaada

Adiga ayaa ah qofka ugu muhiimsan gabadhaada, sidaas darteed waa adiga masuuliyadaada inaad nooc kasta oo FGM ah ka ilaaliso inanataada. Ma aha sharci darro kaliya in la sameeyo uun ee waa xataa, si qarsoodi ah in loo qorsheeyo iyo in la qadariyo FGM. Adiga ayay masuuliyad ka saaran tahay xataa haddii uu qof kale sameeyo qaliinka, iyo xataa haddii uu ka dhaco Swiidhan meel ka baxsan. Waa inaad sameyso waxkasta oo adiga awoodaada ah si aad ilmahaaga uga ilaaliso FGM. Ciqaabta waalidka gabadhooda loo geystey FGM waa muddo xadhig 2-10 sanno ah.

## Caawimo ayaa la heli karaa haddii cadaadi aad dareemayso

Waalidiinta qaarkood ayaa dareemaaya cadaadis qoyska iyo qaraabada kaga yimaada inay gabdhahooda u sameeyaan FGM. Si lagaaga caawiyo inaad u sharaxdo in FGM laga mamnuucay Swiidhan, waxaanu soo saarney qoraal sharaxaaya mamnuucida FGM-ka. Waxaa u sii qaadan kartaa markasta oo aad la kulmeyso dadka isku deyaaya inay cadaadiska ku saaraan, si ay kuu fahmaan, waalid ahaan, khatarta xabsi loogu galaayo haddii aanad gabadhaada ka ilaalin FGM.

**Macluumaad dheeraad ah waxa laga helayaa:** www.hedersfortryck.se

Region Kalmar län

Taariikhda dib loo cusbooneysiiyey: 2016

Qoraalka waxa lagu dalban karaa isagoo ah cod CD ku duuban, Farta indhoolka ama isagoo Swiidhish fudud ah. La soo xidhiidh **Waaxda Isgaarsiinta** adihoo soo maraaya khadka gudbinta 0470-58 80 00.